



UNUGGA XIRIIRKA KOMUYUUNATIGA

QEYBTA BOOLISKA ee COLUMBUS • XAFIISKA JAWAABAHA ISTARAATEJIGA
AH

Waxa Ay Tahay Inaad Sameysid Haddii Fuliyaasha Sharcigu Ama Boolisku Ay Ku Joojiyaan

Ra'yiga Sarkaalka

Inta badan, qofka uu joojiyo sarkaalka fulinta sharcigu wuxuu ilaabaa in sarkaalku ku shaqeynayo xaalado gaar ah oo kakan. Wuxuu isku dayayaa inuu sharciga fuliyo isagoo isla waqtigaas isku dayaya inuu hubiyo amaankaaga iyo weliba amaanka dadka kugu hareereysan.

Marka uu joojiyo sarkaalka fulinta sharcigu, muwaadinka caadiga ihi waxa laga yaabaa inuu caroodo, cabsado ama neerfoose noqdo. Tababarka iyo khibradda sarkaalku waxay bareen inay isla caadifooinkaas ay ka fiiriyaan oo ka filaan marka ay joojiyaan dembiilayaasha. Caadifadahani waxay inta badan sheegaan fal dembiile ah oo waxa laga yaabaa inay ka horreeyaan ka cararka ama weerarka sarkaalka.

Haddii lagu joojiyo oo laguu jaro ganaax, fahan inay ka mid tahay shaqada sarkaalka. Saraakiishu waxa saaran waajib ah inay mareeyaan socodka baabuurta ama taraafiga oo ay fuliyaan sharciga.

Dhammaan la kulannadaada saraakiisha sharci fuliyayaasha ah, waxaad xasuusataa Xeerarkan Dahabiga ah

1. HA sameyn dhaqdhaqaaq kedis ah (SIDA: Boorsada jeebka, koorkaaga, xagga dhexdaada, iwm) Illaa aad u sheegeyso sarkaalka waxa aad rabtid inaad sameyso oo uu sarkaalku kuu oggolaanayo.
2. HA sidan hub.
(Haddii aadan fasax u haysan) ama ha ku kaftamin inaad hub sidatid.
3. HA laacin ama ha muujin hubkaaga haddii aad haysto fasaxa Sidashada Hub Qarsoon (CCW).
Raac amarrada sarkaalka. Sarkaalka u sheeg inaad hub haysatid iyo meesha uu ku jiro haddii lagu xiro.
4. HA taabanin sarkaalka oo ha ku xad gudbin goobtiisa amaanka ee shakhsiyadeed (**xeerku waa 3 fuudh**).
Inaad la shaqeyn weydo sarkaalka waxay sii kordhineysaa oo qura la kulanka sarkaalka.
5. HA noqon qof muran badan
Inaad la shaqeyn weydo sarkaalka waxay sii kordhineysaa oo qura la kulanka sarkaalka.
6. HA dalbanin isla markiiba sharraxaad ama fasiraad.
Mar hore raac amarrada, markaas ka bacdi sarkaalka ka raadso sharraxaad ama kormeeraha sarkaalka.

Sida aad u hubin kartid amaankaaga haddii lagu joojiyo adigoo ku jira baabuurkaaga

1. Isla markiiba baabuurka u qabo dhinaca midgta oo jooji marka aad aragtid nalka cas ee sarkaalka sharci fulinta.
2. Baabuurka ku dhex jir inta sarkaalku kugu soo socdo.
3. Nalka gudaha baabuurka shid haddii lagu joojiyo habeenkii.
4. Gacmahaaga ku hey meel la arki karo – waxa la jecel yahay inaad ku haysid shukaanta korkeeda halkaas oo uu si sahlan u arki karo sarkaalka kugu soo socdaa.
5. Haddii uu ku weydiyo, sarkaalka sii liisankaaga, diwaanka iyo caddeynta caymiska baabuurka.
6. Haddii aad tahay qof heysta fasaxa Sidashada Hub Qarsoon (CCW), u sheeg sarkaalka "waxaan ahay qof haysta fasaxa Sidashada Hub Qarsoon oo waan hubeynsnahay" oo markaas ka bacdi u sheeg halka uu hubkaagu yaallo.
7. Haddii aad rabtid inaad oggaatid waxa laguu joojiyey ama in lagu siiyo wax sharraxaad ah, sidaa dalbo ka hor inta aanu sarkaalku ku laaban gaarigiisa.
8. Ha taaban, handadin ama ha ku sameyn ficiil nidaamka ka baxsan sarkaalka fulinta sharciga.
9. Haddii uu sarkaalku kugu amro inaad ka baxdo baabuurkaaga, sidaas samee adiga oo aan sameynin wax dhaqdhaqaaq degdeg ah.
10. Sarkaalka sii ugu yaraan masaafo saddex fuudh ah oo u oggolaata inuu qabsado shaqadiisa mihnadeed.
11. Baabuurkaaga ku dhex jir waqt kasta illaa iyo inta wax kale laguu sheegayo.

Sida aad u hubin kartid amaankaaga haddii lagu joojiyo adigoo jidka jooga

Haddii uu sarkaal kugu soo dhaqaaqo adigoo jidka maraya – taas macnaheedu maaha in sarkaalku daneynayo inuu adiga ku niyadjabiyo. Haddii lagu xiro, waxaad maskaxda ku haysaa in mar kasta ay jirto sabab aanad adigu inta badan ka war qabin.

Sababaha ugu caamsan ee keena in sarkaal joojiyo qof muwaadin ah waxa ka mid ah kuwa soo socdaa:

1. Wuxa laga yaabaa inaad ka mid tahay dad yar oo jooga meel u dhow goob dembi ka dhacay mar dhaweyd.
2. Dharkaaga ayaa u eg ama la mid ah mid uu gashanaa qof dembi galay.
3. Qof ayaa laga yaaba inuu wacay hay'adda sharci fulinta ama booliska isagoo ka dacwoonayaa joogitaankaaga jidka ama inaad tahay qof "shaki leh".

4. Qof ayaa laga yaabaa inuu sarkaalka farta kuugu fiiqo.
5. Waxa laga yaabaa inaad u dhaqanto si uu sarkaalku u qaato inaad "shaki leedahay" oo waxaabad sii noqotay mid sidii hore ka sii shaki badan marka aad oggaato in sarkaalku adiga ku fiirinayo.

Sarkaalka fulinta sharcigu ma rabo inuu adiga ku sii hayo muddo ka badan inta loo baahan yahay. Isla marka uu sarkaalku oggaado in aanad adigu ahayn qofkii la tuhunsanaa, ayuu kaa raalligalin doonaa waqtiga kaa lumay oo wuxuu si degdeg ah meel kale uga sii wadan doonaa baaritaankiisii.